Xogta waalidka ee ku aadan Kaalmada imtixaanka TNReady ee loogu talagalay Ardayda Naafada ah

Ardaydaada kaalmaynaya sanad dugsiyeedka 2016-17

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 1 aad ee warbixinta habaysan)

Adiga oo ah waalid dhalay ubad naafo ah ahaan, waxaad kaalin ka qaadatay go'aanno ka gaarida adeegyada ubadkaaga loogu talagalay. Tilmaantan waxaa loogu danleeyahay in la kordhiyo fahamkaaga ku aadan isticmaalka isku hagaajinta cashar bixinta iyo qiimaynta ama imtixaanka. Isticmaalka isku hagaajinta waxay qayb muhiim ah ay ka tahay qorshaynta barnaamijka waxbarashada ee ubadkaaga, iyo arday kale ee naafada ah oo kaliya u baahan isbeddel yar ee qaabka waxloo baro iyo imtixaanka in si guul ah ay uga qaybqaataan fasalladooda waxbarasho ee guud.

Fahamka Isku Hagaajinta

Isku hagaajinta cashar bixinta waa aalad iyo hannaan bixiya loogu talagalay in ardayda naafada ay siiso cashar bixin iyo qiimayn oo siman. Helitaanka waa fursad iyo karti shaqsiga uu uga qaabqaadan karo cashar bixinta, wada-hadalka, howlaha, wax soo saarka, iyo qiimaynta la siiyo dhammaan ardayda wada dhigata dugsiyada dadwaynaha. Waxaa la siiyaa "heer fursad loo wada siman yahay." Isku hagaajin la'aan, ardayda naafada ah waxaa dhici karta inaysan awooddin in ay helaan fasal cashar bixin ama ka qaybgelin buuxa ee qiimaynta.

Isku hagaajinta waxaa loogu danleeyahay si meesha looga saaro saamaynta naafanimada iyo in ardayda loo wada fidiyo fursad si aqoonta iyo xirfadda ay u soo bandhigaan. Isku hagaajinta waxaa loogu loogu danleeyahay in ay yareyso ama xitaa ay meesha ka saarto saamaynta ardayga naafadiisa oo hoosna uma dhigeyso waxyaabaha laga fisho waxbarashada oo ma ahan in sawir qalad ah uu ka bixiyo waxa ardayga uu yaqaano iyo waxa uu qaban karo. Isku halayn dhanka isku hagaajinta imtixaanka ma ahan in marnaba ay bedesho cashar bixin ku haboon oo ku celcelin ah ee meelaha imtixaanka looga qaadayo.

Waxaa ka sii fiican, isku hagaajinta waa inay la mid ahaataa ama la mid noqotaa cashar bixinta sida fasalka, imtixaanka fasalka dhexdiisa, iyo imtixaannaadka gobolka ama degmo dugsiyeedka. Hase-ahaatee, waxaa muhiim ah in la xusuusto in isku hagaajin qaarkood cashar bixin kaliya loogu talagalay oo aan loo isticmaali karin qiimaynta gobolka ama degmo dugsiyeedka. Go'aan ka gaarid taabagal ah ee ku talagalka isku hagaajin haboon wuxuu ka bilawdaa ururin iyo muraajicayn ku saabsan xogta ardayga ee la xiriira heerka waxbarasho ee iminka, kartida waxqabadka ee la ku aadan manhajka, iyo taageerada ardayga uu u baahan yahay inta lagu jiro cashar bixinta iyo qiimaynta fasalka dhexdiisa.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 2 aad ee warbixinta habaysan)

Hab-socodka isku hagaajin lagu xusho waa mid xubnayaasha kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaarka [Indivitual Education Program (IEP)]/504 ay isku dayayaan in ay "heer fursad loo wada siman yahay" ay siiyaan ardayga naafada ah, si markaa isaga ama iyadu ay uga qaybgalaan manhaj guud ee waxbarasho.

- Kullamada kooxda ay qabtaan waxaa ku jiri kara wada-hadal ku saabsan in ardayga la siiyo fursado waxbarsho oo siman iyo in la aqoonsado habdhaqanno iyo xeeladdo looguna danleeyahay in aradyga laga caawiyo si aydaygu uu uga gudbo hagardaamooyinka inta uu ku jiro cashar bixinta iyo qiimaynta.
- Go'aan ka gaarida ku wargalsan isku hagaajinta ayaa muhiim ah si loo hubiyo in ka qaybgelin guul leh iyo ka qaybgelin micno u leh ardayda naafada ah ee hanaanka cashar bixinta iyo qiimaynta.
- Go'aannada ku saabsan ku talagal isku hagaajin haboon waxay ka bilaabataa marka go'aanno cashar bixin wanaagsan la gaaro.
- Go'aannada cashar bixinta ku haboon samaynteeda waxaa fududeeya iyada oo ururin iyo muraajaco wanaagsan lagu samayeeyo xogta la xidhiidhka naafada ardayda iyo heerka waxqabadka ardayga ee la xiriira heerka mowduuca waxbarasho ee ardayga.

Isku hagaajinta ayaa inta badan waxaa la isu geeyaa qaybbaha soo socda:

- Bandhig: Isku hagaajintan waxa ay ardaygu u ogolaataa inuu helo xog aan u baahnayn inuu ku akhriyo daabacaadda caadiga ahayd. Nidaamyadan ka beddellan ee ardayga ku heli karo waa qaab dhegeysi, dhowr nooc oo daree-mayaal, dereenka taabashada, iyo araga. (tusaale ahaan in tilmaamaha loogu soo celceliyo, kor wax loogu akhriyo, in goobaabyo wa wayn warqadda jawaabta loogu qoro)
- Jawaab-celin: Isku hagaajintan waxa ay ardaygu u ogolaataa inuu la tartamo sida howlaha, qiimaynta, iyo imtixaannada si aan kaduwanayn oo laylisyada ku xalliyo ama ku hagaajiyo iyada oo uu ardayga isticmaalayo aalad ama hagaaiyo caawiya. (tusaale ahaan, in jawaabbaha buug-yaraha uu uga jawaabo, inuu isticmaalo qoraallo caawiya, inuu isticmaalo kombiyuutarka)
- Wakhtiga/Jadwalka: Isku hagaajintan waxay kordhinnaysaa wakhtiga loogu talagalay in imtixaanka ama layliska lagu dhameyo oo xitaa waxaa dhici karta in la beddello qaabka loo diyaariyay. (tusaale ahaan in wakhtiga loo dheereeyo, biririf joogto ah la siiyo)
- Goobta: Isku hagaajintan isbedelka goobta imtixaanka ama layliska lagu qaadayo ama xaaladdaha goobta layliska lagu qaadayo. (tusaale ahaan qayb yar oo gaar ah, nal gaar ah, qol gooni ah)

Isku hagaajinta iyo Hab-doorin

Isku hagaajintu la ma mid ah sida hab-doorinta. Isku hagaajinta waxaa loogu loogu danleeyahay in la yareeyo saamaynta kartida ardayga; oo looguma danlaha in la gaabiyo waxyaabaha la filayo inuu barto. Isbedelka, yaraynta ama gaabinta waxyaabaha la filayo ayaa inta badan waxaa loogu yeeraa sida hab-doorinta ama bedelka. Ka duwaanshaha isku hagaajinta, isticmaalka hab-doorin joogto ah waxay kor u qaadi kartaa dhextaalka u dhaxeeya horrumarka ardayda naafada ah iyo heerka fasal ee laga filayo. Tan waxaa dhici kart in saamayn ay ku yeelato horrumarka shaqo waxbarasho ee

ardayga, maadaama ay dhici karto in ardayga uu sii wato inuu horrumar sameeyo oo uu qaato shahaadada caadiga ah inuu helo.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 3 aad ee warbixinta habaysan)

Isku hagaajinta Imtixaanka Gobolka

Sharciyada dowladda dhaxe iyo tan gobolka waxa ay ardayga dhigta dugsiyada dadwaynaha uga baahan yihiin, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah, inay ka qaybqaataan imtixaannada sanadlaha ah ee meelaha iyo fasallada lagu sharraxey waxbarashada gaar ah. Kaa soo ardayda naafada oo dhan uga baahan in laga qaybgeliyo imtixaannada gobolka iyo degmo dugsiyeedka waxay wax ka taraysaa in iskuullada, degmo dugsiyeedka, iyo gobolka in lagula xisaabtamo guusha ardaydan. Sidoo kale sharciyadan ayaa ardayda naafada uga baahan yihiin (shaqsiyaadka uu daboolo sida hoos timaada Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyaadka. (IEP) ama Qaybta 504) in loo fidiyo isku hagaajin ku haboon oo daruuriga ah si ay uga qayb qaataan imtixaannadan.

Isku hagaajinta caadiga ah ayaa waxay yihiin kuwa aan waxba ka bedellayn xirfaddaha imtixaanka laga qaadayo. Tusaale ahaan, isticmaalka kalkuleetarka ee qaybha loogu talagalay ee looga shaqaynayo laylisyada xisaabta xallinta waxba kama beddellayso ulajeedka imtixaanka loogu danleeyahay. Isku hagaajinta aan caadiga ahayn ayaa waxaa ah kan beddeli doona qaabka imtixaanka ama xirfadda la bartilmaameed sanaayo. Tusaale ahaan, isticmaalka kalkuleetarka qaarka loogu talagalay cabbirka xisaabta waa isku hagaajin aan caadi ahayn oo looma ogola in lagu isticmaalo imtixaannada gobolka ama degmo dugsiyeedka maxaa yeeley ma soo saarayso cabbir run ah ee ku aadan kartida xisaabta ee ardaygu. Isticmaalka isku hagaajinta ee aan sax ahayn waxay wax ka bedellaysaa danta laga la'haa oo aan cabbir sax ah ka bixinnayn xirfaddaha ardayga oo waxay dhallin kartaa buundo imtixaan oo aan sax ahayn, kaa soo loo xisaabin karo in ardayga uusan garanayn ama xifdin. Dhammaan xubnaha kooxda IEP/504 waxay u baahan yihiin inay bartaan sharciyada iyo tilmaamaha gobolka ee la xiriira isticmaalka isku hagaajinta ee imtixaannaadka gobolka.

Si ay u gaaraan go'aanno ku saabsan isku hagaajinta imtixaanaadka dhammaan xubnaha kooxda oo dhan waxay u baahan yihiin inay wax ka ogaadaan:

- Imtixaanka (waxa uu ka kooban yahay, noocyada su'aallaha ee imtixaanka ku jira iyo xaaladdaha imtixaanka)
- Tilmaamaha imtixaan ka qaadista gobolka
- Xeerarka gaarka ah ee isku hagaajinta gobolka

Kuma ayaa go'aaminnaya?

Dhammaan ardayda naafada ah (kuwa haysta qorshaha IEP ama Qorshaha 504) waxay xaq u leeyihiin isku hagaajin ku haboon oo u ogolaada in si buuxa ay uga qaybqaataan imtixaannada degmo dugsiyeedka iyo kan gobolka. Kooxda IEP/504 ee ardayga waxay dooranayaan isku hagaajin ku aadan cashar bixinta iyo imtixaannada labadaba. Isku hagaajinta waa in la doortaa iyada oo lagu salaynayo baahida ardayda shaqsiga ah, oo ma ahan in lagu saleyo qaybta naafanimo ee ardayga uu qabo, heerka fasalka, ama halka casharka lagu bixiyo. Mar haddii taas la doorto, isku hagaajinta

waa in si joogto ah loogu isticmaalaa cashar bixinta iyo qiimaynta. Macalin kasta iyo shaqaalaha kale ee mas'uulka ka ah inay hirgeliyaan isku hagaajinta waa in lagu wargeliyaa isku hagaajinta gaarka ah oo la doonayo in ardayga loo fidiyo.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 4 aad ee warbixinta habaysan)

Xulashada Isku hagaajinta

Barnaamijka Qiimeynta Faahfaahsan ee Tennessee [Tennessee Comprehensive Assessment Program (TCAP)] wuxuu fidiyaa dhowr nooca oo uu ku taageerayo ardayda ka qaybqaadata. Tirada hoose waxay muujinaysaa qaab dhowr ah ee qiimaynta oo ay ku jiraan hanaanka imtixaan ka qaadis ee la ogol yahay, noocyada helitaanka ee ay heli karaan dhammaan ardayda oo dhan, iyo isku hagaajinta la heli karo sida ku qoran ee looga baahan yahay qorshaha IEP ama qorshaha 504. Hanaanka imtixaan ka qaadista ee la ogol yahay iyo noocyada helitaanka waxaa heli kara dhammaan arday oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa loo fidiyo helitaan sahlan ee horey loo sheegey iyo kuwa loo fidiyo isku hagaajinta. Helitaanka sahlan ee horey loo sheegey waxa kaliya heli kara ardayda qof qaan gaar ah ama kooxda ay u aqoon satay in ay u baahan yihiin nooc ku salaysan in ay muujiyeen iyo laga qoray iyaga oo fasalka fadhiya inay baahi u qabaan noocyadan. Isku hagaajinta waxa kaliya heli kara ardayda laga qoray inay baahi u qabaan oona lagu cadeeyay dukumentigooda rasmiga ah ee qorshaha (IEP ama 504).

Go'aamista isku hagaajin daruuri ah waa in ay qayb ka ahaataa samaynta IEP kasta ama Qorshe 504 kasta. Su'aallahan waa in loo texgeliyaa inta lagu jiro hanaanka xulashada:

- Maxay yihiin kartida iyo baahida waxbarasho ee ardayga?
- Sidee ayaa baahida waxbarasho ee ardayga u saamayn kartaa horrumarka heerka fasal ee heerka maadada?
- Maxay yihiin cashar bixinta gaar ah ee ardaygu u baahan yahay si uu u gaaro heerka fasalka ee heerka maadada?

Marka xigga, kala hadal oo dib u eega isku hagaajinta ardayga uu isticmaalaayay? Weydii su’aalooyinkan:

- Waa maxay isku hagaajintan ardayga si joogto ah uu ugu isticmaalayay inta fasalka uu fadhiyay iyo imtixaannaadka?
- Maxay yihiin waxa ardayga uu u arko ee sida isku hagaajin ay isaga ugu shaqaysay?
- Ma doonaayay ardayga inuu isku hagaajinta isticmaalo?
- Maxay yihiin sida ay u arkaan waalidiinta, macallimiinta, iyo kuwa kale sida ay u arkaan in isku hagaajinta ay u shaqaysay?
- Ma jireen wax dhibaatooyin ee dhanka maaraynta isku hagaajinta la xushay?

Qiimaynta Isku hagaajinta

Qiimaynta sida taaba-galka ee ay isku hagaajinta oo waa in ay noqotaa hanaan joogto ah kaliya oo waa in si hoose ah loogu eegaa samaynta ay ku yeellanayso wanaajinta isku hagaajintan. Kooxda

IEP ama 504 ma ahan inay iska qiyaastaan in xulashada isku hagaajinta ay ahaanayso mid sanadba sanadka kale sii soconayso.
Sanad kasta kooxdu waa inay muraajico ku sameeyaan:

- Isku hagaajin kasta iyo natiijooyin kasta ee imtixaanka ka soo baxa goorta isku hagaajinta loo isticmaalay
- Aragtida ardayda ee sida wanaagsan ee isku hagaajin kasta ay ugu shaqaynayso
- Isku hagaajin taaba-galaya oo isku jira
- Aragtida macallimiinta, kaaliyaha macallimiinta, iyo takhasuslayaasha kale ee ku saabsan qaabka ay ula muuqato sida isku hagaajinta ay u shaqaynayso?

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 5 aad ee warbixinta habaysan)

Su'aallaha Kooxda la Doonayo inay ka Waydiiyaan Qiimeynta Isku hagaajinta

1. Ma wuxuu isticmaalayaa ardayga wax isku hagaajin ah inta ay socoto cashar bixinta fasalka ee aan la ogolaanayn goorta uu ardayga qaadanayo imtixaannada gobolka ama degmo dugsiyeedka?
   Maadaama qaabka isku hagaajin qaar, waxa kaliya loo ogol yahay sida cashar bixinta, oo ma ahan imtixaanada. Haddii ardayga uu u bartay inuu isticmaalo isku hagaajinta, kooxda IEP ga waxay u baahan yihiin inay hubiyaan in ardayga uu fahmo in isku hagaajin qaar uusan la heli doonin inta imtixaan qaadashada ay socoto oo ay ka shaqeeyaan isku hagaajin la ogol yahay ee taageeri kara oo u dhigma inta ardayga inta uu ku gudi jiro imtixaanka.

2. Ma yihiin isku hagaajinta qiimaynta ee loo doortay mid la qaadan karo oo loo ogolaaday qiimayn gaar ah?
   Waxaa jira wax wayn oo ay ku kala duwan yihiin oo u dhaxeeya ogolaansho isku hagaajin oo qiimaynta u gaarka ah. Iska hubi in la raaco dukumentiga tilmaanta qiimaynta ee gaarka ah, kaas oo ay ku qoran tahay isku hagaajinta la qaadan karo.

3. Ardayga ma muujiyaa baahi la og yahay ee uu u qabo dhammaan isku hagaajinta loo xulay oo dhan?
   Cilmi baarista waxay muujinnaysaa in Qorshaha IEP ama Qorsha 504 ay kooxda inta badan xulato isku hagaajin is wada haysta, sida wakhtiga loo dheereeyo iyo qaab fadhi oo kala duwan. Hase-ahaatee, waxaa dhici karta in ardaygu kaliya uu u baahan yahay mid ka mid ah isku hagaajintan. Kooxda IEP ga waxaa mas'uuliyad ka saaran in ay iska hubiyaan in ardaygu aan la siin isku hagaajin aad u hooseeya ama mid ka badan.

4. Miyaa loo xulay dhammaan isku hagaajinta ku qoran Qorshaha IEP ama Qorshaha 504?
   Ardayga haysta Qorshaha IEP ga ama Qorshaha 504 waa in ay haystaan dukumentiga dhammaan wixii isku hagaajin ah ee loo xulay, ee cashar bixinta iyo imtixaan qaadashada labadaba. Mar haddii lagu qoro Qorshaha IEP ama Qorshaha 504, isku hagaajinta waa in loo fidiyaa. Hirgelinta isku hagaajinta waa khasab, oo ma ahan ikhtiyaar.

5. Ma fahamsan yahay ardayga sida loo isticmaalo isku hagaajinta imtixaan qaadashada ee loo xulay?

Ardaygu waa inuu haytaa wakhti ku filan si uu u barto isticmaalka isku hagaajinta loo diyaariyay inta imtixaanka ay ku jiraan. Isku hubi in ardayga uu doonayo inuu isticmaalo isku hagaajinta oo isku hagaajinta uu isticmaalay maalinta imtixaanka maalinta ka horeysay.

6. Miyuu diyaariyay iskuulka hanaan qorsho oo horey ah kaa soo lagu hubinnayo hirgelinta isku hagaajinta loo xuley ee imtixaanka oo ma lagu qoray Qorshaha IEP ama Qorshaha 504 ee ubadkayga?
   Isku hagaajinta waxay kaliya ay wax-tar leeyihiin marka sida la rabay loo dhaqangeliyo. Nasiib darro, hirgelinta isku hagaajinta waxay noqon kartaa wax adag marka la gaaro maalinta imitxaanka la qaadayo, marka shaqaalaha iskuulka ay mashquulsan yihiin. Qorshayn horey ah ee isku hagaajinta sida meel degan, akhriyayaal, ama foormamka isku hagaajinta ayaa muhiim ah oo maamulka u saxan maamulka si isku hagaajinta ay u hirgeliyaan.

Kama dambays, iska hubi in isku hagaajinta aysan u horseedin hab dhaqan imtixaan ka qaadis oo aan haboonayn sida:

- In ardayda jawaabbaha la siiyo inta imtixaanka uu socdo
- In la saxo howsha ardayga
- In ardayga loo ogolaado inuu su'aallo ka yar kaliya ka jawaabo ama la yareeyo tirada jawaab celin ee laga rabay
- In siba la siiyo loo tilmaamo jawaabbaha imtixaanka
- Is loo bedello iyada oo qaab kale loogu sheegayo ama la siinayo xog dheeraad ah

(Shaxankan waxaa laga heli karaa bogga 6 aad ee warbixinta habaysan)

Tilmaamaha Isku hagaajinta

Bandhigga Isku hagaajinta

Ardayda Xaq u yeelan Karta	Su'aallaha la Waydiinayo	Tusaalooyinka Tilmaamaha	Tusaalooyinka Qiimeynta
Ardayda qaaba naafada daabacaada, ku qeexan inay ku adag tahay ama aysan karin in si caadi ah ay u akhriyaan daabacaada caadiga ah maxaa yeeley naafanimo dhanka jirka, daree-mayaasha ama fahamka darteed	• Miyuu ardayga akhrin karaa oo miyuu fahmi karaa tilmaamaha la siiyo? • Miyuu ardaygu ubaahan yahay in kor wax loogu akhriyo? • Miyuu ardayga loo aqoonsaday inuu qabo naafanimo dhanka wax akhriska?	• Far Waweyn • Qalabka farta Wayneeya • Qof u Akhriya • Cajal Maqal • Buug Dijital ah • Qalab Hadlaya (kalkuleetarro, saacaddo, saacad-qabte)	• Shaashad/Qof u Akhriya • Qoraal Hadal u gudbiya • Braille • Aragti ahaan loogu Muujiyo Xisaabta

Isku hagaajin Jawaab-celin

Ardayda Xaq u yeelan Karta	Su'aallaha la Waydiinayo	Tusaalooyinka Tilmaamaha	Tusaalooyinka Qiimeynta

Ardayda qaaba naafonnimo dhanka jirka, daree-mayaasha, ama naafonnimo dhanka waxbrashada (oo ay ku jirto dhibaato dhaka xusuusta isku raacsiinta, tilmaameedyada, isku-toosnaanta, ama habbaynta)	• Miyuu ardayga isticmaali karaa qallin-qore ama qalab kale ee wax lagu qoro? • Miyuu ardayga leeyahay naafanimo saameeya kartidooda wax lagu higgaadiyo? • Miyuu ardayga leeyahay dhibaato dhanka raadraacyada boga sida ay isku xigxigaan iyo in ay meeshooda sii joogaan?	• Loo qoro • Xusuus loo qaato • Cajal codka Duuba • Uga Jawaabida Buug-yaraha Imtixaanka • Qalab Higgaadinna iyo Naxwaha • Garaafyo Habbeeye	• Cod-u-bedela Qoraal • Qoraalka Qof Qaan gaar ah • Xaanshiyo lagu Falaado • Kalmad Tilmaame

Isku hagaajin Saacad Qabte iyo Jadwaleeye

Ardayda Xaq u yeelan Karta	Su'aallaha la Waydiinayo	Tusaalooyinka Tilmaamaha	Tusaalooyinka Qiimeynta
Ardayda wakhtiga dheeraadka u baahan, oo wakhtiga dheer aan la qabsan karin, kuwa qaba naafonimo dhanka caafimaadka la xiriira, si sahlan u daala, qabo cuntooyin iyo/ama baahiyo daawayn gaar ah	• Miyuu ardayga si joogto ah ugu shaqayn karaa inta lagu jiro wakhtiga ardayda loo ogol yahay inuu imtixaanka uu qaato oo dhan? • Ardayga ma si sahal u daalaa maxaa yeeley sabab dhinnaanshahooda u la xiriira darteed? • Ardayga ma wuxuu u baahan yahay wakhtiyo gaagaaban iyo biriirif joogo ah?	• Wakhtiga Loo Dheereeyo • Biririf Joogto ah • Kullamo Imtixaan Qaadis Dhowr ah	• Wakhtiga Loo Dheereeyo • Biririf Joogto ah

Isku hagaajinta Goobta

Ardayda Xaq u yeelan Karta	Su'aallaha la Waydiinayo	Tusaalooyinka Tilmaamaha	Tusaalooyinka Qiimeynta
Ardayda sida sahlan ugu maahsama meelaha ay fadhiyaan arday badan, oo meel arday yar fadhisa jecel	• Ardaygu ma si sahlan ayuu ugu maahsamaa dadka kale? • Ardaygu miyuu dhibaato ku qabaa inuu howshiisa sii wato? • Ardaygu ma wuxuu muujiyaa aqlaaqo ardayda kale qashqashaad ku keenta?	• Bedel Qolka ama Goobta • Sameecada Dhegaha ama Qalabka Dhegeysiga • Goob yar oo Wax Barasho	• Bedel Qolka ama Goobta • Sameecada Dhegaha ama Qalabka Dhegeysiga • Goob yar oo Wax Barasho

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 7 aad ee warbixinta habaysan)

Qofkasta tallo ayuu mudan yahay

Goorta la gaarayo go'aannada isku hagaajinta, waxaa aad muhiim u ah in qofkasta la siiyo fursad uu talo ku soo jeediyo. Dadka waxaa ka mid ah waalidiinta, shaqaalaha waxbarashada gaarka, macallimiinta ku meelgaar ah, shaqaalaha waxbarashada caadiga ah, iyo adeegbixiyayaasha xiriirka la leh. Hase-ahaatee, ha iloobin in ubadkaaga aad waydiiso. Haddii ubadkaaga uusan doonayn in isku hagaajin gaar ah uusan isticmaalin, waxaa jira qaabbab kale in la isku dayo. Waxaa muhiim ah in la xusuusto in ubadkaaga uu sii wadan doono inuu sii barto oo uu sii hormaro, xitaa haddii tartiib-tartiib uu yahay. Marba haddii la sii wado waxbarashada xirfaddaha assaasiga ah ee lagu barto waxbarashada sida akhriska iyo qorista, baahida isku hagaajin qaar waa in wakhti ka dib laga yareeyaa. Isku hagaajinta badan ayaa ah kuwo ku meel gaar ah. Ubadkaaga waad caawin kartaa inuu aayar-aayar loogu yareeyo isku halaynta isku hagaajinta la siiyay oo kartidiisa ama kartideeda isku haleeyo.

Wada shaqeynta ayaa dariiri ah goorta ubadkaaga la siinayo isku hagaajin. Mas'uuliyadda barnaamijka waxbarasho ee ubadkaaga dad badan ayay dusha ka saaran tahay. Waxaad Xaq u Leedahay. Adiga waalid ahaan, adiga waxaad u baahan tahay in kooxdaas aad ka noqoto xubin firfircoon. Wada shaqeynta waxaa dhici karta in loo isticmaalo xallinta dhibaato guud, in la magacaabo illooyinka baahida loo qabo, iyo in lala socdo wax-tarka barnaamij cashar bixinta iyo isticmaalka isku hagaajinta. Goorta ubadkaaga uu dhibaato la kulmayo, ha ka cabsanin in aad waydiisato kaalmo oo markastaaba xusuusnaw in ubadkaaga aad ka soo qaybgeliso wixii wada-sheekaysi ah oo idin dhexmara.

Hadafyadeenu waa isku wada mid: **waxaan doonaynaa in dhammaan ardaydeena oo dhan ay la yimaadaan xirfaddo ay dunida kaga shaqaystaa, kaa soo uu ku jiro fekirka muhiimka ah, wax qorista, iyo xallinta dhibaatada.** Oo, waxaan doonaynaa in aan horey ugu socono in mid kasta oo idinka idin ka mid ah aad tihiin wadaageyaasha howshan- si ugu dambayntii iskuulladeena ay ugu noqdaan goob wax lagu barto oo waxbarasho wanaagsan laga helo oo ahmiyaddana saaro horrumarka carruurta. Mid kasta oo carruurteena ka mid ah waxay xaq u leeyihiin in loo diyaariyo tallaabada xigta safarkooda waxbarasho, oo TNReady ayaa ah hal dariiq aan ku hubbinayno in loo diyaariyo fursaddaha wanaagsan ee hortooda jira in ay gaaraan.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo TNReady.gov